

# FRONTEX

SOMALI

**Xaqa aad u leedahay inaad cabasho u soo gubbisoo Frontex**



## **Xuquuqaha aadanaha iyo xorriyaadaha aasaasiga ah ee aad leedahay**

Waxaad xaq u leedahay in la ixtiraamo fayyo-qabkaaga jireed iyo maskaxeed, in laguula dhaqmo si sharaf, iyo magangalyo leh iyo inaan lagu takoorin. Kuwaani waxay ka mid yihiin xuquuqaha aasaasiga ah ee ku jira sharciga Yurub.

Waxaad xaq u leedahay inaad cabato ama dacwooto haddii aad aaminsan tahay in xuquuqahaaga aasaasiga ah lagu xadgudbay xilli hawl ay samaynayaan Frontex, Hay'adda Xuduudaha iyo Ilaalada Xeebaha Yurub.

Hay'addu waxay ka caawisaa Dawladaha Xubnaha ka ah Hawgallada Midowga Yurub (EU) inay xakameeyaan xuduudaha kore ee Midowga Yurub. Waxaa jira dad badan oo ku lug leh hawlahaas, sida saraakiisha diiwaangelisa xogtaada markaad timaado Midowga Yurub, shaqaalaha kaa qaadaya faraha, turjubaanada, ciidanka eeyaha wata, ciidanka la socda dadka lagu celinayo waddankooda, dhakhaatiirta iyo dhexdhexaadiyeyaasha dhaqameed. Dhammaan dadkaasi waa inay ixtiraamaan xuquuqahaaga aasaasiga ah. Haddii kale, waxaad cabasho u gudbin kartaa Hay'adda.

## Yaa soo gudbin kara cabasho?

Waxaad soo gudbin kartaa cabasho, iyadoon la eegi doonin da'da aad jirto, haddii aad aaminsan tahay in xuquuqahaaga aasaasiga ah uu ku xadgudbay qof ku lug leh hawlaha Hay'adda.

Waxaa ku matali kara qof, qareen, ama urur kasta, kuwaasoo soo gudbin kara cabasho iyagoo ku matalaya.

Waxaad soo gudbin kartaa cabasho ka madax-banaan xaaladaada degganaansho ee Yurub (tusaale, haddii aad haysato sharci joogto ah oo sax ah ama aad magangalyo codsanayso).

Haddii dhowr qof ay isla ficilladaasi saameeyeen, waxaad soo gudbin kartaan cabasho wadajir ah.

## Sida cabashada loo soo gudbiyo?

Waa inaad soo gudbiso cabasho qoraal ah aadna bixiso macluumaadkaaga xiriirka. Haddii aad rabto inaad isticmaasho foomka cabashada, waxaad ka heli kartaa mid ku qoran luuqado kala duwan bogga Hay'adda. Waxaad sidoo kale ku soo diri kartaa cabasho iimaylka ama boostada.

Fadlan sharrax sida xuquuqahaaga loogu xadgudbay, noocyada xuquuqaha lagu xadgudbay, iyo halka xadgudubku ka dhacay. Waxaad soo diri kartaa waxyaabo dheeraad ah oo ku saabsan cabashada aad

qabto waqti kasta. Hay'adda ayaa sidoo kale kula soo xiriiri karta si ay u hesho macluumaad dheeraad ah.

Waxaad sidoo kale ku soo diri kartaa cabashada aad qabto onlaynka, iimaylka ama boostada:

**Mareegta:**

<https://frontex.europa.eu/fundamental-rights/complaints-mechanism/>

**Iimaylka:**

[complaints@frontex.europa.eu](mailto:complaints@frontex.europa.eu)

**Cinwaanka boostada:**

Frontex - European Border and Coast Guard Agency  
Sarkaalka Xuquuqaha Aasaasiga ah (Fundamental Rights Officer)  
Plac Europejski 6  
00-844 Warsaw  
Poland

## **Sidee ayuu geedi-socodka cabashada u shaqeeyaa?**

Sarkaalka Xuquuqaha Aasaasiga ah ee Hay'adda ayaa daraasad ku samayn doona cabashada aad qabto oo go'aan ka gaari doona in wax laga qaban karo iyo in kale. Haddii kale, waxaa lagugu wargelin doonaa, mar kasta oo ay suurtoagal tahay, wax ku saabsan ikhtiyaarada kale ee loogu talagalay cabashada aad qabto.

Waxaa jira shuruudo gaar ah oo lagu aqbali karo cabashooyinka. Waxaad ka dhex heli kartaa xeerarka Hay'adda ee khuseeya xallinta cabashada ee ku jira mareegta Hay'adda.

Haddii cabashada aad qabto wax laga qaban karo, waxaa loo diri doonaa Agaasimaha Fulinta ee Hay'adda. Haddii shaqaale ka socda Dal Xubin ka ah Midowga Yurub (EU) uu ku lug leeyahay kiiskaaga, cabashada sidoo kale waxaa loo diri doonaa mas'uuliyiinta Dalkaas Xubinta ka ah Midowga Yurub. Mas'uuliyiintan ayaa mas'uul ka noqon doona bixinta natiijooyinka waxayna dib ugu soo warcelin doonaan Sarkaalka Xuquuqaha Aasaasiga ah, kaasoo markaas ku ogeysiin doona wax ku saabsan natiijooyinka kiiskaaga.

Waqtiga loo baahan yahay in wax looga qabto cabashada wuu kala duwanaan karaa, iyadoo ku xiran kiiska. Si kastaba ha ahaatee, Hay'adda waxaa ka go'an inay si wax-ku-ool ah u maarayso oo dabagal ugu sameyso cabashada aad qabto.

Macluumaadkaaga gaarka ah (magaca, macluumaadka xiriirka, iwm.) waxaa lala wadaagi doonaa mas'uuliyiinta awoodda u leh, balse keliya marka aad oggolaato, oo looma adeegsan doono ujeeddo kasta oo aan ka ahayn mida baaritaanka cabashada aad qabto.

Waxaad sidoo kale kiiskaaga u gudbin kartaa hay'adaha kale, sida maxkamadaha qaranka, kuwaasoo sidoo kale kaa caawin kara ilaalinta xuquuqahaaga.

# FRONTEX

Plac Europejski 6  
00-844 Warsaw, Poland  
T +48 22 205 95 00  
F +48 22 205 95 01

[frontex@frontex.europa.eu](mailto:frontex@frontex.europa.eu)  
[www.frontex.europa.eu](http://www.frontex.europa.eu)

© European Border and Coast Guard Agency (Frontex), 2023



Publications Office  
of the European Union



FPI 23.0269

PDF:  
TT-08-23-011-SO-N  
ISBN 978-92-9467-871-3  
doi:10.2819/44457